

*Warbixinta ajaanibka ee
dee gaanka dabiiciga ah*



Daryeel deegaanka sidoo kalana dhaqaale

Kusoo dhawow Finland! Finland waa wadan kuyaala waqooyiga oo leh dhir iyo wabiyo badan. Dabeecad iyo biyo nadiifi waa muhiim dadka finnishka. Dabeecada iyo deegaanka fiican waa lagu nastaa lagana soo saaraa cuno.

Deegaanka iyo dabeecada wanaagsani waa shay qaaliya, waxa kale oo ku xidhan nolasheena si aynu ugu neefsano hawo nadiifa, iyo biyo nadiifa oo aynu cabno iyo caro wanaagsan oo wax ka beerno. Waxa kale oo muhiima in aynu dhasheena uga tagno deegaankan iyo dabeecadan wanaagsan.

Qof kasta oo inaga midi wuxuu daryeeli karaa deegaanka iyo dabeecada aynu ku noolnahay. Waxaynu isticmaalnaa koronto iyo tamar, kuwaas oo ay kadhaxaan qashin badan. Waxaynu isticmaalnaa biyo, kuwaas oo nadiifintooda iyo kululayntoodu ku baxdo koronto badani. Maalin walba waxaynu soo saarna qashin badan. Nasiib wanaag waxaynu samayn karnaa in aynu yarano qashinka si aynu deegaanka u daryeelno.

Qoraalkan waxaa ku sheegaynaa tusaalayn, siday aynu u daryeelilahayn deegaanka. Wax qabad yar oo aad samaysaana wuxuu waxtar weyn u leeyahay deegaanka. Hadii aad daryeesho deegaankana, waxaad badbaadinaysaa. Tusaale ahaan biilka biyaha iyo korontada, marka si macquula loo isticmaalo.

Qoraalkani wuxuu ka koobanyahay Deganaansha, kala saarida qashinka, dib uhabaynta, kusocodka deegaanka, jid marista, waxakale oo muhiimad gaara siinaynaa isticmaalka korontada iyo tamarta sidoo kale isticmaalka biyaha.

Qoraalkan waxaa diyaariyey Reer Tampere Ekokumppanit Oy waxaana maalgaliyey Wasaarada deegaanka. Ururka Qoxootiga caawiyaya Mashruuca Guryaha, wuxuu ka qaybqaatay turjumida macluumaadkan. Qoraalkan waxaa loogu tala galay dadka wadankan usoo guuray iyo kuwa la shaqeeya ee ku nool wadankan Finland. Qoraalkan waa la isticmaali karaa, la badin karaa la kobigarayn karaa si xor ah, marka loo isticmaalo in la sheego meesha uu ka yimid.

Daabacada: Ekokumppanit Oy
Qoraalka: Päivi Välimäki / Ekokumppanit Oy
Turjumaada: Finso International / Muhamed Fozi
Sawirada iyo farshaxanka: Annu Oksala.

Waxaa suurtagaliyey in la daabaco Wasaarada Deegaanka.

Hordhac

Nolasha – korontada iyo biyaha.....5

Jikada.....	6
Dhigida raashinka.....	6
Diyaarinta raashinka.....	8
Dhaqida weelka.....	9
Tuushka, WC iyo saunada.....	9
Laydhka iyo mishiinada korontada.....	10
Kulaylinta iyo hawo gediska.....	12

Kalasaarida Qashinka.....13

Ka hortaga in qashin dhasho qashinka.....	14
Maxaa qashinka loo kala saaraa.....	14
Sidee qashinka loo kala saaraa.....	15
Sidee u wanaagsan ee qashinka loo kalo saaro.....	15
Xageebaa qashinka la geeyaa.....	16
Maxaa qashinka lagu sameeyaa.....	16
Qashimada guud ahaaneed ugu badan ee la kala saaro.....	17
Qashinka qoyan.....	17
Waraaqaha.....	17
Kartoonka.....	18
Biraha.....	18
Dhalooyinka.....	18
Qashinka qalalan.....	19
Qashinka deegaanka dhibaadata u leh.....	19
Korontada- iyo elektarooniga.....	20
Dawooyinka waqtigoodu dhamaaday.....	20
Qashinka tamarta ama korontada.....	20

Dib u habaynta qashinka.....21

Dhalooyinka dukaanka dib loogu cesho.....	22
Dharka, alaabta iyo qalabka guryaha.....	23
Taayirada gaadhiga iyo gaadhiga.....	24

libsashada – Calaamada deegaanka.....25

Caalamada shimbirta Ceelal-joog.....	26
Raashinka dabiiciga ah.....	26
Ganacsiga xaq ah.....	26

Deegaanka iyo xuquuqda qpf walba.....27

Joogista deegaanka dabiiciga ah.....	28
Waqti ku qaadshada deegaanka.....	28
Qashin ka ilaalinta.....	28
Dabshidida.....	29
Waxyaabaha baxa iyo gurashada.....	29
Midhaha iyo barkimo waraabaha.....	29
Kalumaysiga.....	31
Ugaadhsiga.....	31

Dhaqaaqa iyo gawaadhida.....33

Lugaynta.....	34
Baaskiilka.....	34
Baabuurta ka dhexshaqeeya xaafadaha.....	35
Basaska la raaco ee ukla baxa gobolada.....	35
Tareenka.....	35
Gaadhiga qafku gaarka u leeyahay.....	35

Deganaanshaha: korontada iyo biyaha



Halkan laba waxaan ku sheegaynaa laba arin oo lagu yaraynkaro korontada iyo isticmaalkeeda iyo waliba sida aad u dhaqaalayn lahayd lacagtaada. Waxakale oo ay faaiido u tahay deegaanka iyo dabecada: marka aynu isticmaalno koronto yar waxakale oo hagaagaya deegaanka qiiqa marka la yareeyo isticmaalka beeraha ku shaqeeya korontada. Digniin sidoo kale waxaa haboon in la yareeyo isticmaalka biyaha adigoo dhaqaalaynaya.

Jikada

Korontada jikada waxaa loo isticmaalaa samaynta raashinka, weelxalida iyo dhigida raashinka. Ogowse inaad yarayso isticmaalka korontada iyo biyaha.

Kaydinta raashinka

Qaboojiyaha (finijeerka, barafeeyaha) waa kuwa ugu isticmaalka badan korontada guriga. Isticmaalida sida saxda ahi waxay yaraysaa cunista korontada.



Gee maalo kala gooniya (Miishiinka weelka, hiitarka) marka ay cadceedu kulushahay. Ka feejignow, inay hawadu si fiican ugu wareegto miishanada dhexdooda qaboojiyaha si aanu u kululaan, hadii kale waxaa suurto gal ah in isticmaalka korontadu sadexjibaarmo. Qaboojiyaha dushiisa banee qiyaastii 5-10 cm.



Gee mishiinka qaboojiyaha meesha saxda ah. Finijeerka waxaad ka dhigtaa $+5^{\circ}\text{C}$ kan barafeeyaha -18°C



Hadii Finijeerka ama barafeeyuhu aanu lahayn meel laga qiyaaso, waxaad ka iibsan kartaa tukaanka. Hadii uu bato kulaylku waxaa xumaanaya raashinka hadii qabowgu batana waxaa badanaya isticmaalka korontada. Hadii hal digrii ku biirana waxaa kordhaya isticmaalka korontada 5%.



Sii waqti uu raashinka kululi inta uu qaboobayo ee aanad galin barafeeyaha. Ha balaqin bilaa ujeedo albaabka.



Daryeel mishiinka qaboojiha inta badan: nadiifi oo eeg rabadhadu ama caagaga siday yihiin



Qaboojiyaha waa in la dhalaaliyaa, marka uu gaaro barafku 1 cm:r. Hadii barafku ku hadho dhinacyada waxaa labajibaarmaya isticmaalka korontada.

Nadiifinta / Dhalaalinta qaboojiha

- Ka dami korontada qaboojiyaha kana wada saar dhamaan alaabta ku jirta si uu barafku uga dhalaalo. Dhigo meel qabow alaabta aad ka saartay qaboojiyaha tusaale ahaan balakoonka waqtiga qabowga ama qaboojiye kale.
- Hadaad doonaysid in barafku si dhakhso ah u dhalaalo waxaad dhexdhigtaa weel ay ku jiraan biyo kulu qaboojiyaha khaanadiisa. Markaa waa inaad xidhaa qaboojiyaha albaabkiisa.
- Gidaarka qaboojiyaha waad ka daadinkartaa, marka barafku dhalaalo. Hase ahaatee ha isku dayin inaad isticmaasho mid iyo wax af-dheer oo aad haga daadiso barafka.
- Marka dhamaan barafku ka dhamaado, nadiifi si taxadirleh, ku shid korontada una qiyaas. Intaa kadib waxaad dib u qiyaasi doontaa qabowga qaboojiyaha, marka gudhiisu gaadho.
- 18.Haku ilaabin qabowga saaidka ah, waayo wuxuu laba jibaarayaa isticmaalka korontada.



Waxaa haboon in la dhalaaliyo qaboojiyaha, waxaa yaraanaya qaboojiyaha korontada uu isticmaalayo.



Marka aad soo iibsanaayo qaboojiye cusub, waxaa fiican inaad u doorato isticmaalka awood korontada. Waxay ku qorantahay awood cunista korontadu mishiinka, tarjooyinka A–G.

Calaamadaha tamarta (korontada)

- Calaamada qaboojiha awoodiisu, waxay kuusheegaysaa sida uu u isticmaalo korontada.
- Calaamadaasina waa qasab in mar walba lagu qoraa, “sida mishiinka dharka dhaqa, kan weelka dhaqa, kan wax lagu kulayliyo, nalka, iyo kuwa hawada keenaba.
- A-nooca looyaqaan iyo nalka ayaa ugu dab cunis yar. Qaboojiyaha noociisu waa A+ iyo A++ -noociisu kuwaas oo ah kuwa ugu dab cunista yar..
- Calaamada mishiinada waxa kale oo lagu sheegaa, inta kilowatt ee uu cuno mihuunku iyo kuuxa uu mihuunku leeyahay.



Diyaarinta raashinka

Shawlada iyo foornadu waxay isticmaalaan dab aad u badan, hadii aan la eegin ama aan loo qiyaasin nooca raashinka la karinayo:



U isticmaal qiyaasta dheriga shawladaha mida aad isticmaalayso. Hadii aad aad saarto disti weyn shawlada yar ama disti yar shawlada weyn waxaad isticmaalaysaa koronto xad dhaaf ah.



Isticmaal biyo kugu filan oo qudhaata waxa aad karinayso, Distidana furka saar marka biyuhu kululaanayaan si biyha kulaylkoodu kuugu dhakhsado.




U qiyaas numbarka aad wax ku karinayso marka biyuhu karaana ka yaree dabka, waayo number wayn oo aad ku daysaa ma da' dajinayo karinta cuntada.



Ka faa'idayso foornada kulaylkeeda hore iyo danbe, waayo noocyada raashinka waxaa la gashaa foornada oo kulul. Sidoo kalana baktii foornada goor hore, waayo raashinku wuu ku bislaanayaa kulaylkeeda danbe. Keega iyo waxyaabaha la dubo ku samee qiyaasta loogu talagalay.



U isticmaal mikrooga cuntooyinka fudud diirintooda. Aad buu uga dhakhso badan yahay shawlada iyo foornada ugana dab cunis yar yahay.



U isticmaal qiyaasta dheriga shawladaha mida aad isticmaalayso.

Biyaha la cabo

- Finland biyaha qasabadu waa nadiif, waana bilaa dhibaato in la cabaa.
- Biyaha qasabada aad baa loo ilaashaa, waxaanay baadhayaashu sheegeen inay ka nadiifsanyihiin kuwa caagadaha lagu shubay.
- U isticmaal raashin karinta biyaha qabow, waayo waxaa suurtoagal ah in biyaha guriga ee kulul ay soo raacaan biro qashin ahi.

Weel dhaqida

Weelka qaabka loo maydhaa waxay ka qaybqaadataa isticmaalka biyaha iyo korontada:



Marka aad weelka xalaysid/dhaqaysid gacmaha, dabool meesha weelka lagu dhaqo si aad hadhow weelka kale ugu xalaysid. Haku maydhin weelka biyaha oo soconaya, waayo waxay keenayaan biyo badan oo khasaara.



Marka aad weelka ku dhaqayso mishiinka weelka waa inuu buuxo, una doorotaa numberka aad ku dhaqayso sida weelku u yahay uskag. Numberka, kulayka ugu yari waxay cunayaan koronto aad u yar.



U isticmaal saabuunta ugu fiican deegaanka, waayo way uga fiican yihiin dhulka kuwa aan ku haboonayn deegaanka.

Qolka qubayska (Xamaamka), mushqusha iyo saunada

Xamaamka lagu maydho maalinkasta waxaa lagu isticmaalaa biyo badan. Isku day inaad yarayso biyaha kulul, waayo waxaa ku baxda tamar badan sidii biyaha loo kululayn lahaa.



Xidh biyaha marka aad is marinayso saabuunta iyo shampooga. Ayayna biyuhu usocon bilaa ujeedo!



Si dhakhso ah u qubayso. Labada mirir waxaa ka baxa qasabada 24 litir oo biyo ah 10 mirirna waxaa ka baxaya 120 litir oo biyo ah!



Si dhakhso ah usamee qasabada iyo meelaha kale ee jaban, si aanay biyuhu u daadan. Inyar oo daadataana waxay ku qarashgarayn sanadkii boqolaal euro.



Maydh dharka mashiinka oo buuxa. Ilaali qiyaasta dharka iyo kulaylka lagu maydho. Istimmaal qiyaas yar hadii dharku aanu ahayn mid aad u wasakhaysan.



Finland biyaha waxaa lagu qiyaasaa inay yihiin kuwo aad u khafiifa, sidaa aawadeed qasaalada weelka iyo mida dharka waxaa ku filan. Oomo aad u yar waxaanay ku qorantahay qiyaastu Oomada dusheeda.



Saunada korontada ku shaqaysaa waxay ku shaqaysaa koronto aad u badan, sidaa awgeed waxaa haboon inaad gasho markay kululaato. Kulaylka ugu fiican waa 70-80 digrii. 100 wuxuu badinayaa oo qudhaata tamarta qiyaastii 30%..

Mushqushu maaha meel qashinka lagu qubo

Dhuumaha mushqushu si fudud bay ku xidhmaan, haka dhigan qashin qub.

WC-Mushqusha waxa lagu SAMAYN KARAA:

- saxarada iyo waraaqa mushqusha
- biyaha wax lagu dhaqo
- fuudka ama biyaha kabaxa raashinka ama maraqa

WC Mushaqa laguma SAMAY KARO:

- waraaqaha gacmaha, rabadhad, harqadaha
- xafaayada, buushka nabarada, kondomka
- raashinka hadhaaga, saliida raashinka
- timaha, gaska ayga, dhogorta bisada
- iyo qashinkale ama wax meesha xidhaya

Digniin! RSaliida raashinka laguma shubi karo meelaha biyuhu maraan ee qasabadaha, ee waa in la qaadaa inta dhalo ama weel ku haboon lagu shubo la geeyaaa meelaha loogu talagalay ama waraaqaha gacmaha intaad cabsiiso ku rid qashinka qoyan.

Nalka iyo qalabka korontada



Guriga waxaa inta badan shidan nalalka. Baqtii hadaad ka maaranto, ka faa'iidayso oo isticmaalaya iftiinka caadiga ah.



Bakhtii qalabka isticmaala korontada, hadii aanad isticmaalanyi. Sidoo kalana marka ay yihiin diyaarka waxay isticmaalayaan korontoe e wada dami. Tusaale ahaan TV iyo digiboksiga.



Soo iibso qaybisada meesha qudhaata laga damiyo si aad ugu iticmaasho tiiviiga, digiboxsiga iyo DVD si aad mar qudhaata u wada xidho wada damiso.



Ka saar xadhiga telefoonka lagu buuxiyo korontada marka uu kuu buuxsamo. Xadhigu hadii uu meesha iskaga jiro wuxuu cunayaa koronto.



Qalabka korontada iyo ilaalintooda

- Ha ilobin inad damiso shawlada, fornada, makiinada kaafeega iwm. Waxay dhalinkaraan dab.
- Intaad iticmaal, baro sida uu u isticmaalo korontada.
- Hawada isticmaalain qaybiso dab oo isku dhow, waxaa ka dhalan kara dab.
- Haisku dayin inaad samayso mishiinada korontada, ugee farsamayaqaanka.



Soo iibso nalka loogu talagalay dabeecada iyo deegaanka, kuwaas oo isticmaal boqolkiiba 5 inta ay isticmaalaan nalalka caadiga ahi. Nalalkan tamarta yar qaataana way labanlaabmayaan isticmaalkoodu. Nalalka caadiga ahi way ka baxayaan suuqa sanadka 2012.

Nalka isticmaala tamarta yar

Kala Doorashada labada nal

Nalka Caadiga		Nalka tamarta yar cuna
60 W	→	15 W
40 W	→	11 W

Digniin! Nalka tamarta yar ee aad isticmaashay waxad raacinaysa qashinka aan u ficnayn deegaanka ama carada.



Hadii aad doonayso inaad isticmaasho nalkan tamaryare cune, waa inaad u badalataa heshiishka korontada mida cagaaran.

Korontada cagaaran

- Korontada cagaarani waa mid cusub oo u laga dhaliyo dabeecada deegaanka.
- Korontada cagaaran waxaa lagaa dhaliyaa dabaysha, cadceeda, geedaha iyo awooda biyaha.
- Korontada cagaaran kama dhalato qiiq am asun sida waxyaabaha hawada iyo dabeecada xumeeya.

Kululaynta iyo hawo gediska



Soo iibso heerkulbeeg (cabire) kuu sheega jawiga guriga si aad u ogaato gurigaaga xaraardiisa. Qiyaasta ugu fiicani waa +20-21 °C qolka hurdada waxaa ku filan +18-19 °C. Hadii aad hal figrii kan dhintana waxaad dhaqaalaysan 5% kulaylka guriga.



Marka ay aad u kulushahay, yaree kulaylka hiyiitarka, hana isticmaal maraawaxad. Hadii ay kugu filnaanweydo naaqusida hiyiitarku la xidhiidh shirkada guriga ama xida ka masuulka ah.



Ka ilaali daahyada inay qariyaan hiyiitarka, si kulaylku u wada gaadho guriga. Hana duldhigin hiyiitarka dhar aad ku qalajinayso.



Laydhi guriga maalin walba si dhakhso ah: fur qolalka daaqadahooda si ay isu dhaafto hawadu ilaa laba mirir. Hase ahaatee ayayna kuu furnaan daaqaduhu xiligii gurigu kululaan lahaa.

Kala saarida qashinka



Waxaynu soo saarnaa maalin walba qashin. Waxaase muhiima, inaan kala saarno qashinka aynu samayno iyo in aynu gayno meelaha loogu talagalay ee la geeyo. Sidaasna waxaa inoogu badbaadaya ciida iyo deegaanka aynu ku noolnahay waxa kale oo yaraanaya beeraha lagu diyaariyo korontada iyo qiiqa ka dhasha.

Hoos waxaan ku sheegaynaa sida qashinka loo kala saaro, iyo dib u isticmaalkiisa. Waayo si kalo duwan ayay qoloba u kala saartaa qashinka, halkanse waxaan ku sheegaynaa qaab kamida qaababka loo kala saaro qashinka. Waxaase muhiim ah inaad iyna barato sida deegaankaaga qashinka loo kala saaro una isticmaansho.

Ka hortaga dhibaataada qashinka

Waxaa wanaagsanaan lahayd, hadii qashinka aanay waxba ka dhalanayn. Waxaase looga hortagi karaa si fudud:

-  Adigoo iska ilaasha maacuunka pakidaysan, dooro fikrad ahaan mid qudhaata oo hal litir ah sida yugurta u xidhan shanta xabo inaad qaadata mid litira.
-  Iska ilaali hadhaa badan oo raashina. Soo iibso oo samee in kugu filan oo qudhaata. Kaydso hadii raashin kuu soo hadho ama sikale uga faaidayso intaad daadin lahayd.
-  Dooro qaar mudo badan ku haya ama kuwo la samayn karo, intaad soo iibsan lahayd kuwa mar qudha la isticmaalo.
-  Iska qaad dharka, alaabta dheeraadka, kee meelaha lageeyo ama lagu iibiyo.
-  Soo amaaho ama kirayso alaabta aanad isticmaalayn inta badan.
-  Hagaaji ama tol dharka, kabaha kaa xumaada si aad u sii isticmaasho mudo. Kabatolaha ayaa sameeya kabaha kaa dilaac, dawaarluhuna dharka, baaskiilana baaskiilaha. Waxaanad dhamaantood ku helayaa sifudud eeg buuga telefoonka ama internetka.

Qahin

Qashinku waa shayga ama alaabta, aan mardanbe loo baahnayn ama aan la isticmaalayn. Qashin tusaale ahaan waa hadhaaga raashinka, alaabta burburtay, jaraaidka hore, ama baytariga dhamaaday.

Maxaa qashinka loo kala saaraa

Hadii qashin samaysmo, waxaa looga faaiidaysan karaa siyaabo badan. Si looga faaidaysto waxyaabaha qashinku ka koobanyahayna waa in lakala saaraa.

Maraka qashinka la kala saaro ee dib loo isticmaalo, waxaan daryeelnay deegaanka: qashinka waxaa laga sameeyaa waxyaabo kaladuwan. Waxa kale oo yaraanaya qashinka dhabta ah ee tagaya meesha qashinka lagu gubo. Markaa kala saarida noocyada qashinku waa muhiim, waxay ka ilaalinaysaa inay dhulka iyo carada galaan waxyaabaha sunta ahi.

Qashinka cuntada ama qoyan waxaa haboon in sigaara loo saaro, hadii qashinka kale lagu daro way isla qoyayaan ama suucayaan. Waxaanay ku noqonayaan deegaanka iyo carada khatar, waana mid kamida dhibaatooyinka hawada iyo carada haysa ee keeno hawo gadiska aduunka ka jira; wuxuuna ka khatar badan yahay makhsinada beeraha qaaca ka dhasha boqolkiiba 20..

Sidee qashinka loo kala saaraa



Gobolada dalku way ku kala duwanyihiin, sida loo kala saaro qashinka.



Hadana guud ahaan Finland waxaa la ururiyaa waraaqaha, kar tonka, biraha, dhalada, korontada iyo qalabka elektrooniga iyo qashinka guriga.



Meelo badana waxaa la ururiyaa qashinka qoyan, kartomada, iyo qalabka kuwa korontada.



Waxaa macquula xitaa magacyada qashinku inay u kala duwanyihiin deeganada, tusaale ahaan qashinka isku jira, midka qalalan iyo qashinka kudaafada waa isku wada mid micnahoodu.



Digniini! Baro gobolkaaga sida qashinka loo kala saaro ama deegaankaaga.

Sidee u fiican ee qashinka loo kala saaraa

Qashinka sida loo kala saaraa way fududahay waxaa fiican in markaaba aad kala saarto. Waa inaad leedahay laba meelood oo qashinka lagu kala rido, qashinka qoyan iyo midka qalalan islamarkaa adoo jikada joogana aad kala saarto. Qashinka qoyan waxaa fiican in uu leeyahay dabool si urtu kaaga yaraato.

Sidoo kale waa inaad leedahay meel aad ku rido kartoona, biraha, dhalooyinka, daasadaha iyo baytarida, waxaa haboon kartoona oo kale inaad laablaabto ood isku jajabiso si uuna kaaga qaadan boos badan, daasadaha iyo dhalooyinka waa inaad ka maydhaa urta. Jaraaidka waana inaad iyana meel ku kurtaa si aad hadhow u gayso meeshooda.



Xagee la geeyaa qashinka

Guryaha dabaqyada iyo kuwa gaagaaban waxaa inta badan, banaanka yaala meelo loogu talagalay qashinka sida: caagaga qashinka oo kala duwan, aqlada qaarkood waxaa yaala qaar intaa kabadan. Waxaa intabadan yaala mid loogu talagalay qashinka qoyan kan engan iyo qaarkale oo lagu rido waraaqaha iyo kartoomada. Waxaa muhiim ah in aad qashinba kiisa ku rido.

Qashinada kale ee dibloo isticmaalaa waxay inta badan yaalaan dukaamada raashinka banaankooda. Waxaana lagu ridaa inta badan dhalooyinka, biraha waraaqaha, kartoomada iyo dhagaxaanta ama baytarida. Qashinka qaarkood waxaa la geeyaa sida baytariyada, rimoodka iyo kuwa tilifoonada dukaamada iibiyaa. Kuwaas oo leh meelo lagu kaydiyo waxa kale oo ay kuyaalaan dukaamada. Laydhaka iyo laambadaha korontadana waxaa la geeyaa meelaha ugaarka ah, sida qaybaha loogu tala galay oo kale.

Maxaa lagu sameeyaa qashinka



Qashinka qoyan waa la warshadeeyaa waxaana laga sameeyaa ciida dhirta ama cagaarka laga beero, ciidaas oo loo isticmaalo waxyaabo badan sida meesha xitaa qashinka lagu gubo oo dib loogu hagaajiyo.



Waraaqahaista waxaa dib looga sameeyaa waraaqaha jaraaidka lagu qoro ama kuwa gacmaha layska mariyo iyo kuwa musqusha.



Kartonka waxaa isna laga sameeyaa kartoona khaanadaha ah iyo waraaqa gacmaha iyo mushqusha kartoona ku dhexjira.



Birta dib ayaa loo sameeyaa waxaana laga dhigaa biro kale si loogu isticmaalo warshadaha raashinka qaydhiin sameeya.



LDhalooyinka kdib ayaa loo warshadeeyaa waxaana laga sameeyaa dhalooyin cusub iyo caro ama ciid dhulka dib loogu nafaqeeyo.



Qashinka baytariyada waxaa la geeyaa saldhiga loogu tala gala, waana la burburiyaa si aanay dhigulka u waxyeelayn.



Korontada- iyo elektroniga iyana waa la burburiyaa waxaana laga sameeyaa waxyaabo loo isticmaalo warshadaha.



Qashinka qalalan waxaa la geeyaa qashin qubka, kudaafada.



Qashinka korontada waa lagubaa, loona isticmaalaa dib warshada tamarta.

Qashimada guud ahaaneed ugu badan ee la kala saaro

Qashinka qoyan

Qashinka qaoyani waa cuntada iyo dhamaan waxyaabaha baxa:

- Hadhaaga raashinka iyo kan xumaada
- diirka khudaarta iyo midhaha
- lafta kaluunka iyo diirkiisa
- huubiga shaaha iyo kaafeega
- warqada shaaha iyo tan kafeega lgu kariyo
- qalka beedka iyo diirka doofarka muuska ueeg
- diirka digaaga qashinka ka soo hara
- waraaqaha gacmaha, siinka iyo kuwa saxanka keega la saaro
- waraaqaha keega lagu dubo
- ciida ubaxa, dhirta caleemahooda iyo ubaxa qalalay
- beerta guriga laamaha ka duula (caleenta, ubaxa, laanta)
- raashinka Ayga, bisadaha iyo wixii kale.
- xaydh, hadhaaga subaga, saliida wax lagu shiilo (lama raacinkaro qasabada!)




- Kurid raashinka qoyan oo dhan geeda loogu talo galay si aanu u suynin, ama aanu u qurmin una daadan hareeraha ka gali warqad, dukaanka ka soo gado bacda loogu talo galay. Ka miir fuudka si aanu u di'in qashinku marka aad qaadaysa.

Waraaqaha

Waraaqaha kaaga soo dhaca khaanada boostada oo dhami waa in la kaydiyaa tusaal ahaan:

- wargeysyada
- xayaysiiska, anfloobka
- waraaqa kobiga
- waraaqaha cadcad (waraaqaha cawlan ee sida bacda ah iyagu waxay raacaayaan kartoonka)
- buuga oo bilaa jaldi ah


- Ma haboona in la kala saaro qashinka iswata.



Kartoonka

Waraaqaha -, kartoonka- iyo kartoomada, tusale:

- caanaha- iyo cabitaanka (iyo kuwa ka samayn aluumiyaanka)
- kuwa buskutka iyo konfalagaska
- suxuunta mar la isticmaalo iyo koobabkooda
- Sambiilka kartoonka ah
- kartoomada caadiga ah



- Nadiifi oo dhaq kartoomada ay ku jiraan dareerayaashu kana qalaji qoyaanka. Intaa kadibna isku jabi ama laablaab kuna ururi meel.

Biraha

Biraha yar-yar iyo kuwa mishiinada guriga, tusaale ahaan:

- taasadaha cabitaanka
- alumiyaanka wax lagu foorneeyo iyo waraaqhooda
- quraaradaha uu kujiro xawaashku
- biraha guriga iyo qalabka wax lagu xidhxidho
- makiinadaha guriga (suxuunta foornada, kaawiyada, mishinka kahfiga, kan shaaha lagu kariyo, katimaha lagu feedho, cadayga korontada, makiinada gadhka lagu xiiro)
- saacada oo bilaa bayteriya, telefanka gacanta oo bilaa bayteriya.



- Nadiifi daasaha cabitaanka sida kuwa Koka-Kolaha intaanad celin.

Dhalooyinka

- dhalooyinka aan lacagta ahayn iyo kalarka leh noocoodu yahay (casaan, cagaarka)
- kubaayadaha jabay, suxuunta, kuwa lagu rido ubaxa iwm
- iyo qaruuradaha kale ama dhalooyinka sida kuwa cadarka



- Dhalooyinka furka wata ka fur dabadeedna nadiifi intaanad gayn meesha loogu talagalay.

- Muraayadaha guryahay iyaga lama geeyo meesha dhalada waxaa lageeyaa xafiisyada qashinka lagu kala saaro.

Qashinka isku dhexjirka ee tooska looo geeyo kudaafada

Qashinkan isku dhexjirkii waa waa qashinka, aan dib loo isticmaali karin mana ah mid dhibweyn ku haya deegaanka. Tusale.

- bacaha iyo waxa ka samaysan
- nalka iyo laambadaha
- (Digniin ! noocyada qaarbaa u daran deegaanka)
- qashinka la fiqo iyo ka huufarka
- haashka sigaarka iyo danbaska
- xaafayadaha, balastarka iyo qashinka dhakhtarada
- xaarka ayga iyo ka bisadaha
- kabaha iyo dharka gaboobay
- saxanka iyo koobka halka mar la isticmaalo



Qashinka aan u fiicnayn deegaanka ama carada

Qashinkan aan sheegaynaa waa qashinka aan u fiicnayn carada iyo deegaanka. Sida.

- Qashinka laydhka iyo nalalka (waxaa ku dhex jira sun dadka iyo deegaanka wax yeesha, ha jebin)
- baytariga taleefanka iyo kan remootka telefayshanka
- saabunta iyo waxyaabaha lagu dhaqo (dharka ama weelka)
- aalkolada gacmaha lagu dhaqo
- daawooyinka iyo qalabka wax lagu cabiro (farmasiiga gee)
- xabagta, koolka, ranjiga
- sunta, iyo kimikada
- sunta dhirta lagu buufiyo
- geedaha raaga
- saliida hadhaaga, bensiinka
- biyaha gaadhiga iyo kuwa qabowga ilkaasha
- daqiiqda iyo cunbada dabka lagu bakhtiyo



-Digniin! Ha isku qasin ama dhex ururin qashinka deegaanka dhibaateeya iyo qashinka kale. Qashinka waxaa haboon inaad bacdiisii hore ku rido.

- Nalka lama jabinkaro, sunta ku dhexjirta aawadeed.

- Qashinka deegaanka iyo dabeecada u daran waxaa qabta xarumo gooniya la xiriir sida xarumaha qashinka laga maamulo .

- Baytariyada telefoonka iyo kuwarimoodka tiifiig waxaa iyanalageeyaa meelo ugaara, sida dukaamada hortooda oo kale ama meelaha lagu iibiyo elaktarooniga.

Qalabka elketarooniga iyo korontoda

Qalabka korontada xumaaday iyo kuwa aan dibloo isticmaalayn

- telefashanka iyo radiyaha xumaaday
- qalabka combuyutarka (mishiinada kobiga, sawirka)
- qaboojiyaha iyo barafeeyaha
- mishiinka foonada
- ruufarka iyo wixii lamida (iwm)



- Soo gudbi sidoo kale qashinka ka soo hadha gaadhiga iyo birihiisa meelaha loogu talagalay sida:- Pirkanmaalla.

Dawada dhacday ama waqtigeedii dhamaaday

Wixii daawo iyo caafimaad ku saabsan ee waqtigoodu dhamado ku celi farmasiiga.



Qashinka korontada

Meelo kamida wadankan Finland ayaa lagu farsameeyaa, qashinka ka dhasha awooda korontada si dib loo isticmaalo. Waxaa kamida meelahaas. Caasimada iyo nawaaxigeeda, Kymenlaaksossa, Keski-Suomessa, Turussa ja Oulussa. Waxaa kamida dharka, bacaha, waaraadka dunta, looxaanta, iyo koobada ka samaysan kartoona.

Dib u isticmaalka alaabta qashinka



Dib u isticmaalida qashinku ama kala saarida qashinku, waa sidii loo yarayn lahaa qashinka ku danbeeya qashin qubka. Macnaha ka danbeeyaana waxa weeye marka aad isticmaasho ama aad badalayso, in dib loo habeeyo si loo isticmaalo. Dhamaan qalabka aad ka baxday ee aanad u baahnayna aad geysa meelaha loogu talo galay. Finland dhamaan dhalooyinka iyo caagadaha laga cabo cabitaanka dib ayaa loo isticmaalaa.

Dhalooyinka, caagadaha iyo daasadaha

Dhamaan waxyaabaha laga cabo cabitaanada waxaa dib loogu ceshaa dukaamada iyagoo madhan, kuwaas ku danbeeya in dib loo soo badalo. Dhalooyinka iyo daasadaha cabitaanka markaad ku celiso dukaanka waxaa lagu soo celinayaa lacag u dhaxaysa (0,10–0,40 €). dhalooyinka iyo caagadahaas dib ayaa loo soo cuboonaysiiyaa.

Dhalooyinka cabitaanka iyo caagadahaba waxaa ku celin kartaa dukaamada raashinka iibiya ama kuwa qamrada (dukaanka khamriga). (Dukaanka Liidal)Lidl isaga kuwiisa isaga oo qudhaata ayuunbaa qaata. Waxaa ku qoron dhalooyinka, caagadaha cabitaanka iyo daasahahaha lacagta ay ku rahmanyihiin ama lagu soo celinayo marka aad dukaanka dib ugu celiso. ”Sida sawirka ka muuqata”. Waxa kale oo aad celisaa dhalooyinka kale ama caagadaha kale ee aan lacagi ku qornay, si iyagana dib loo soo habeeyo.



Sawirka : Waxaad ku arkaysaa lacagta midkiiba yahay.

Dhalooyinka la cesho waa la dhaqaa dibna loo soo buuxiyaa marlabaad marka ay ku laabtaan warshada cabitaanta. Dhalada quraarada ah waxaa la isticmaali karaa 40 jeer! Kuwo kale ee aan dib loo isticmaalina waxaa laga sameeyaa kuwo cusub. Kuwan daasadaha ahna dib ayaa loo warshadeeyaa.

Sida loo cesho:

- Dhalooyinka iyo kuwa daasadaha ah waxaa lagu ridaa mishiinka yaala dukaamada, wuxuuna inta badan yaalaa dukaanka xagiisa hore.
- Marba hal xabo ku rid mishiinka dhexdiisa si uu uqaado.
- Dhalooyinka waa in furka aad ka furtaa, laakiin kuwa caaga ah ha ku xindhnaado. Dhamaantoodna waa inay ahaadan qaar samayskoodu caadiyahay iyo kuwo loogu talagalay, hadii anay sidaa ahayn mishiinku ma garanayo.
- Marka Xabada u danbaysaa ku xeroootana taabo badhanka si uu kuu siiyo warqada lacagta.

Dharka, Alaabta iyo qalabka guriga

Wareeji ama cid kale sii dharka aanad rabin inaad xidhato ee la qaadan karayo, ama qalabka aad iska badashay ee sariirta, armaajada, miiska iwm, ee tayadoodu fiicantahay iyo qalabka kaleba, waxaa laga yaabaa inay qofkale caawiyaan. Adiguna waxaad wax ka iibsana kartaa riiqisa. Waxaa lagu iibiyaa dharka ciyaalka oo fiican iyo alaabo kaleba. Sidoo kale adiguna waad ka iibin kartaa, kana iibsana karta meelaha alaabta la geeyo ama huudhaydhka ama njaraaidka iyo internetkaba.



Dharka, kabaha iyo qalabka wanaagsan

- Meelaha alaabtan lagu wareejiyo waxaa kamida ama la geeyo, huudhaydhlayaasha, UFF:n tai Fidan. Dharka , kabaha, maryaha kale waa inay ahaadaan qaar hagaagsan oo nadiifa.



Alaabta guryahay

- Meelaha alaabta lageeyo, huudhaydhlayaasha ama kuwa iisada/iibiya. Alaabtan guryahay waxa kale oo aad ku iibinkartaa jaraaidka ama internetka iyo dukaamada oo aad ku dhajiso ogaysiis waxa aad gadayso.



Mishiinada guriga

- Waxaa iyana lageeyaa meelaha loogu talagalay, huudhaydhlayaasha ama shirkadaha wax iibsada/iibiya. Jaaridka ood ku qorto iidheh iyo waliba inernetka iyo meelaha dukaamada wax lagu xaysiiyo.



Dharka madhay ama dhamaaday

- Waxaad gaysaa meelaha lagu rido qashinka qalalan.



Qalabka guriga ee jajabay

- Qalabka guriga ee jajabay sida fadhiga, miiska, kursiga iwm, waa inaad adigu gaysaa meelaha qashin qubka loogu talagalay. Maaha inaad dhigto meelaha xaafada ee qashinka la dhigo, waxa kale oo aad ugu yeedhaysaa shirkado kaa qaada oo lacaga.



Mishiinda laydhka

- Mishiinada yar-yar (tusaal. mishiinka timiha, kanroodiga diiriya) waaxaad ku ridi kartaa qashinka dib loo isticmaalayo ee biraha. Kuwa waaweyn (tusaale. qaboojiyaha, TV, combuyutarka) waa in la geeyaa goobaha qashinka ama goobaha qashinka carada u daran. Shirkado badana waxayba leeyihiin gawaadhi loogu talo galay. Hadii loo baahdana waxaad weydiisan kartaa shirkada guriga.

Huudhaydhle

- Huudhaylaha waxaa lagu iibiyaa alaabta la soo isticmaalay dharka, qalabka guryaha, buugta iyo miishanada guryaha.
- Inta badan huudhaydhlayaasha waxaad ka helayaas meel aad wax ku iibiso adiga ayaana iibinaya alaabta aanad u baahnayn.
- Huudhaydhlayaasha ururada deeqda bixiya waxaa kamida (tusaale ahaan. Pelastusarmeija, Suomen Punainen Risti, Fida International, UFF) waxay qaataan dharka iyo alaabta iyo dhamaan wixi deeqa si ay dib usii iibiyaan. Wixii ka soo baxana dib ayaa loogu caawiyaa ama lagu tabarucaa dadka aan waxba haysan.
- UFF:lla, Pelastusarmeijalla ja Fidalla waxay leeyihiin meelo dharka lagu rido. Waxaanay inta badan ku yaalaan dukaamada hortooda. Dharku waa inay ahaadaan qaar dhaqan oo bac lagu riday/ku jira.

Xarunta dib u bixinta

- Kierrätyskeskus waa xarunta, dib looga sii qaado alaabta la isticmaalay si loo siiyo qof kale.
- Kierrätyskeskukseen waxaad gayn kartaa alaabta iyo dharka aanad u baahnayn ee la isticmaali karo ama hagaagsan.
- Sidoo kale mishiinada guriga ee aan halaabin/xumaan ee shaqaynaya iyo sariiraha iwm.

Meelaha iibsashada- iyo sii iibinta

- Meelahaasi waxay iibsadaan alaabta hagaagsan ee guryaha, dibna u sii iibiyaan (sida sariiraha , iyo qalabka mishiinda ama dharkaba.

Taayirada gawaadhida iyo gawaadhida

Taayirada gawaadhida iyo mootooyinka aanad u baahnayn laguma rido karo qashinka caadiga ah, ee waxaa lageeyaa meelaha taayirada lagu iibiyo. Taayirada waa inaad ka saarto daawaha inta aad gayn meelahaas.

Gawaadhida la isticmaalay iyo kuwa jajaban waxaad gaynaysaa bilaa lacag Suomen Autokierrätys Oy:n xarunteeda. Gawaarida jajabtayna waxaa dib loo isticmaalaa birahooda. Eeg warbixin dheeraada: www.autokierratys.fi

libsashada – Calaamada deegaanka



Markaad adeeganayso waxaa haboon in aad ka fikirto deegaanka, waxaana ku caawinaysa calaamadaha ku qoran noocyada adeega. Kuwaas oo kuu sheegaya in alaabtani ay tahay qaar u fiican deeganka iyo habka loo sameeyayba. Waxaana calaamadan lagu tilmaameysaa samayska iyo tayada nooca iyo sida loo sameeyay, waxana si gaara u ilaasha masuuliyiinta dawlada.

Caalamada shimbirta Ceelal-joog iyo Calamada Yurub ee deegaanka

Calaamada deegaanku waxay ka turjumaysaa, inuu yaryahay dhibaata shaygu u leeyahay deegaanka oo aad u yar ilaa inta uu jiro dhan. Finland waxay isticmaashaa calaamada Skandanifiyamka (shimbirta afka dhuuban). Calaamada shimbirtani waa ta ugu badan Finland, waxakale oo la iga isticmaala iskandanifiyamka. Calaamada Yurubna waxaa laga isticmaala yurub oo dhan intabadana waxyaabaha lagu maydho, kuwa la marsado iyo waraaqaha.



Cunada dabiiciga u baxda

Khudaartan iyo cuntooyinka sida dabiiciga u baxda waxaad ku garanaysaa calaamada luomu ku qorantahay. Calaamadu waxay timaamaysaa in ay yihiin qaar dabiici ah waxaanay inta badan ku qorantahay 95% alaabta cayrin ee beeralaydu soo saarto. Calaamadan xoolaha ku dhaqani way ka tayo ficanyihiin kuwa caadiga ah, dukaamada adeeguna inta badan way hayaan alaabta calaamadani ku dhigantahay tusaale ahaan daqiiqda, boorashka, khudaarta, caanaha iyo waxyaabaha laga sameeyo. Magaalooyinka waaweyna waxaa inta badan kuyaala dukaamo u gaara iibinta alaabtan dabeciga ah.



Ganacsiga xaq

Calaamadini waxay iyaduna sheegaysaa, alaabta ay soo saaran beeralayda dunida sadexaad soo saaraan iyo shirkadaha waaweyni inay kala heleen qiimo xaq si lagu kala garto. Maacuunka aad baa loo ilaaliyaa deegaan ahaan iyo in loo isticmaalo shaqo ciyaal. Finland waxaa intabadan lagu iibiyaa (Reilun kahvi) kafeega xaq, shaah, shukulaato, khudaar, malab iyo sonkor. Waxaa lagu iibiyaa dukaamada caadiga ah iyo qaar loogu talagalay oo ugaara.



Deegaanka iyo xuquuqda qof walba



Finland waxaa ku yaal inkabadan 180 000 wabi qiyaastiina 70% waxaa qariyey dhir iyo geedo. Webiyada iyo dhirta waxaa laga helaa khayraad kala duwan iyo in lagu dalxiiso lagana ugaadhsado. Deegaan iyo dabeecad fiicanina waa shay qaali ah, oo waliba haboon in la daryeelo.

Deegaanka/dabiiciga Finland waa sahal. Finland iyo wadamada Iskandaniifiyamku waxay leeyihiin sharci fasaxaya in qofkasta uu u leeyahay xuquuq iyo xaq uu ku dhexsocon karo kaymaha iyo deegaanka. Waxaase muhiima in aad ilaaliso deegaanka sida dhirta oo kale ama khayraadka ku jira iyo waliba xayawaanada ku nool duurka.

Joogista deegaanka dabiiciga ah

Deegaanka dabiiciga ah waa la joogi karaa, baaskiil lagu wadi karaa lagu ciyaari karaa, marka aanad wax rabshada u keenayn. dadkale gurigooda, beertooda ama meelaha dhirtu ka beerantahay iyo ubaxyadu. Hase ahaatee waqtiga barafka waa lagu dul ciyaari karaa beeraha laftigooda.

Waqtii ku qaadashada deegaanka dabiiciga ah

Waqtii ku qaadashada deegaanka dabiiciga ahi, waa ku nasashada dhulka, ku dabaalashada, ku cadceedsiga iyo in aad u soo dalxiisto meelaha baadiyaha ah (1-2 habeen) ayaa inta badan la ogolyahay, marka aanad deegaanka dhibaataynayn. Hadiise aad joogayso in kabadan 2 habeen waa inaad ka haysato ogolaansho qofka dhulka leh. Meelaha ay kamid yihiin dabaasha, meelaha jardiinooyinka ama kuwa lagu nasto.

Qashin in lagu daadiyo

Finland waxaa jira sharci diidaya in qashinka la daadiyo. Qashinku noocuudoonaba ha ahaado waa ka madnuuc in lagu shubo jidadka iyo deegaanka kaleba. Sidoo kale qashinka dhulka waxyeelleeya ee uu kamid yahay bansiinka iyo saliida, in lagu daadiyo dhulka ama biyaha waa ka madnuuc. Waxaana ka masuula inuu nadiifiyo qofka ku shubay inuu nadiifiyo.

Wadan yar – oo isugu jira noocyobadan

- Finland waa wadan aad u yar dhul ahaan, hase ahaatee deegaanka iyo kaymaha Finland waa qaar kala duwan.
- Galbeedka-Finland waa dhul u badan beeralay, sidoo kalana bariga Finland wuxuu u badan yahay dhir iyo kaymo kala duwan.
- Qaybta dhexe ee wadankana waxaa u badan webiyo, dooxyo, togog waxaana loogu yeedhee Togga-Finland.
- Waqooyiga Finland waa dhul banaan intabadana geeduhu ku yar yihiin waxa uu leeyahay taagag badan.
- Finland waxaa ku yaala oo kale xeebo quruxbadan iyo jasiirado, waxa kale oo ku yaala gacanka labaad ee aduunka ugu weyn ee layidhaa Xeebta Barriga.

Dabshidida

Dabshidida waxay u baahan tahay in la helo ogolaansho qofka dhulka leh, inta badana dadka dalxiisayaasha ama dhulka daawanaya waxaa loogu dalagalay meelo dabka lagu shido oo aan u baahnayn ogolaansho. Loomana baahna sidoo kale in lasoo qaato ogolaansho hadii aad wax karsanayso.

DIGNIIN! Dabshididu waa madnuuc marwalba, marka dhirta iyo deegaanka ay khatarkutahay. Waxaana laga ogaankaraa barnaamijka cimilada ee tiiviiga iyo radioyga laga soo daayo. Dabka lama shidikaro, hadii dhuklku uu qalalanyahay oo dabku u fidi karo si sahlan. Markaad shido waa inaad sifiican u bakhtiisaa biyo badana ku shubtaa.



Waxyaabaha baxa iyo gurashadooda


Ubaxa, midhaha, barkimo waraabaha iyo waxyaabaha dhulka laga guro waa la goosan karaa, hadii ay tahay dhulka la soconkaro. Geedo ama waxyaabaha baxa qaarbaan la taaban karin. Geedaha lama jari karo hadii aanad ahayn qof waxka dhisaya meesha oo leh mooyaane. Caleemaha iyo ubaxyada ama midhaha daata waa la qaadan karaa ama lguran karaa, hase yeeshee ukunta lama qaadan karo lamana jebinkaro.

Midho gurashada iyo barkimo waraabaha

Finland waa laga guran karaa midhaha iyo barimo waraabaha si xor ah meel walba, aan ka ahayn meelaha qofkale leeyahay ee aanad ka haysan ogonlaansho. Hase ahaateema fiicna inaad ka gurato jidadka gawaadhida, waayo waxaa ku dhacaya qiiqa gawaadhida.

Midha cas-cas ee kabaxa dhulka

- Midhaha ugu badan ee la cuno waxaa kamida mustikka, puolukka, vadelma, karpalo, ahomansikka iyo lakka.
- Waqtiga ugu fiican ee la beero midhahan waa bislaha luulyo-ogosto, karpalon waxaa la beeraa waqtiga roobka sebtamber-oktoobar.
- Waxaa jira oo kale midho noocan u eeg oo sun ah, waxaase haboon inaad gurato oo qudha kuwa dusha ku xusan.




Barkimo waraabe

- Barkimo waraabaha noocyada loo jecelyahay waxaa kamida keltavahvero ama kantarelli, suppilovahvero, erilaiset tatit, rouskut ja haperot.
- Waqtiga ugu fiican ee lahelu waa ogosto-sebtambar.
- Marka aad guranayso barkimo waraabaha waxaa haboon si aad u garato nooca fiican inaad isticmaasho buugta sharaxda noocyada ay ka koobantahay, waxaanad ka heli kartaa Laybareeriga.

DIGNIIN! Noocyo ka mida barkimo waraabaha ayaa ah sun hadii aad cuntana waxaa laga yaabaa inaad aad ugu xanuunsato ama nimotaba. Kuwaa sunta ahna waxaa kamida punainen kärpässieni, valkokärpässieni, myrkköseitikki, pulkkosieni iyo korvasieni. Waa inaad gurataa oo kaliya barkimo waraabaha la cuno oo qudhaata!

Kaluumaysiga

Kalmuuasiga waa la ogolyahay waqtiga kulaylaha iyo qaboobaha ah ba. Looma baahna ogolaansho inaad u soo qaadato hadii ay da'daadu tahay 18-64- jir hase ahaatee waa inaad bixi cashuurta kaluumsiga. Waxa kale oo loo baahan yahay inaad soo qaadato ogolaansho qofka leh deegaanka aad ka kaluumsanayso. Warbixin dheeraadaa waxaa ka haysaa xafiiska waqtiga firaaqada.



Ugaadhsiga

Ugaadhsiga waxaa loo ogolyahay oo qudhaata qofka, soo bartay qaabka loo ugaadhsado iyo kuwa laga qaado lacagta ugaadhsiga. Sidoo kale waxaa loo baahanyahay ogolaansho qoriga lagu ugaadhsado. Ugaadhsiga waxaa kale oo looga baahanyahay inuu ka hayso ogolaansho meesha uu ka ugaansanyo qofka leh. Sharci daro hadii aad ku ugaadhsato waxaa jabisay sharciga. Qofka raba inuu ugaadhsado waa inuu yahay qof soo maray ama soo qaatay dhamaan sharciyadan looga baahanyahay.

Ilaalinta deegaanka

- Ilaalinta deegaanka meelaha qaar, waa in loo daayoo sida dabiiciga ah oo aan waxba laga badalin dadkana waa laga ilaaliyaa meelahaas.
- Meelahaas inta badan waa meelo ay ka baxaan dhir qaasa, ama xayawaan joogo ama wax kale oo dabiici oola ilaallinayo.
- Meelahaas la ilaalinayo waxaa kamida jardiinooyinka qaranka iyo kuwan dabiiciga ah.
- Finland waxaa kuyaala ilaa 570 oo deegaanka la ilaasho ah.

Beerta Xoriyada

- Beeraha Xoriyada waa meel wayn oo ay ka baxaan dhir kala nooc ahi. Waa meel qaali ah dabiici ahaan bilicweyna u leh deegaanka iyo bulshada.
- Finland waxaa ku yaala 35 Beerta Xoriyada. Kuwa ugu waa weyna waxay ku yaaliin waqooyiga wadanka Lemmenjoen ja Urho Kekkosen Beeraha Xoriyada.
- Beeraha Xoriyada waa meelaha u badan ee dalxiisayaashu soo booqdaan.

Warbixin dheeraadaa waxaad ka haysaa Wasaarada dhirta iyo daaqa boggooda www.luontoon.fi (suomi, ruotsi, englanti, saame).



Dhaqaaqa iyo gawaadhida



Lugaynta, baaskiilka iyo gaadiidka guud oo la raaca waxay u fiicantahay deegaanka iyo dabecada. Waxa kale oo ay ka fiicantahay inaad gaadhigaaga ku socoto. Sidoo kalana waxay u fiicantahay caafimaad ahaan iyo dhaqaale ahaanba. Hadii qofwalba gaadhi kaxaysan lahaa waxaa xumaan lahayd hawada, waxaase lagaga hortegi karaa in la yareeyo gawaadhida aan wadano.

Lugaynta

Finland way sahlantahay in aad lugahaaga ku socoto, waayo waa amaan hadii aad lugayso. Intabadan waxaa wadooyinka ku ag qabsan meel gooniya oo ay dadku ku lugeeyaan. Jidadka gawaadhida maraana waxaa in badan ku agtaal meel dadku ku socdaan. Lugayntu waxa kale oo ay u fiicantahay caafimaadka, waxaad ku ilaabaysa xanuuno badan.

Widhwidhe, Ifime bilada ama bahal dadku ay qaataan marka ay lugaynayaan

- Finland waqtigada xagaaga ama jiilaalka (waqtiga barafka) way madowdahaydadku waxay qaataan bahal iftiinta ama widhwidha si gawaadhidu u arkaan in qof meesha lugaynayo. Sidaa awadeed waa inaad isticmaasho.
- (Heijastimia) Widhwidhaha waxaa lagu iibiyaadukaamada inta badana waxaa lagu bixiyaaba bilaasha.
- Garamada dhalaalana sidoo kale waxaa lagu iibiya dukaamada dharka.



Baaskiil wadida

Waxa kale oo fiican baaskiilka, dadka lugeeya iyo kuwa baaskiilka wadaa waxaa loogu tala galayjidgooniya, inta badana ay ku taalo calaamada baaskiilku. Mar-marka qaarkoodna waxaa lagu kala badhaa xariijin cad dadka lugaynaya iyo kuwa baaskiilka wata. Jidadka yar-yar ee lagu lugeeyo waxaa loogu talagalay ciyaalka 12 ka yar. Wixii intaa ka waynina waa inay ku wadaan jidka wadada ku agyaala.



Baaskiil wadaha maxaa la haboon

- Isticmaal marka aad kaxaynayso baaskiilka koofiyada la xidho, waxay kaa ilaalinaysaa dhaawaca hadii shil dhaco ama kula dhaco baaskiilku. Ciyaalku waa inay iyagu mar walba qaataan.
- Isticmaal waqtiga mugdiga laydh iyo bahasha widhwidhaysa. laydhka lagu xidho baaskiilka iyo koofiyad waxaana lagu iibiya dukaamada dharka ciyaaraha iibiya.
- Baaskiilkaada daryeel si joogto ah: eeg biriigyada iyo marshadiisa, saliid mari sisilada. hadii kalana gee baaskiilaha si uu uhagaajo.
- Barao calaamadaha gawaadhida iyo sharciga sida loo kala leeyahay leexadka.

Baabuurta ka dhexshaqaysa xaafadaha , magaalada

Inta badan Finland waxaa ka dhexshaqeeya xaafadaha ama magaalada basas, tareemo ama daraam. Waxaase u badan basas ukala baxa xaafadaha.

Tilmaan sida baska loo raaco:

- Marka basku u soo dhawaado barta laga raaco, u gacan haadi si dirawalku kuu arko una istaago, marka ay madow dahay tus geedi iftiinta ama widhwidha.
- Marka aad fuusho baska albaaka hore, isticmaal kaadhka baska ama iibso tigidh, adoo siinaya dirawalka lacag dhan ama yar si aanu dirawalku mashquulin.
- Hadaad gaadhiga ilmaha wadato ka fuul baska albaabka dhexe. Hadaad u baahato caawin weydiiso dadka si laguula qaado gaadhiga ilmaha.
- Marka aad dagayso goor hore taabo badhanka laga joojiyo ee cas STOP. Ka deg albaabka dhexe ama danbe.

Basaska

Basasku waxa kale oo ay u baxaan dhamaan gobolada iyo magaalooyinka Finland. Dadka waxaa qaada basas kala duwan waxaase isku xidha shirkada basaska ". Tigidhka baska waxaad ka iibsan kartaa baska dhexdiisa ama shirkada basaska Matkahuolto Oy iyo internetka bogga shirkada. Macluumaad dheeraada bogga shirkada: www.matkahuolto.fi

Tareenka

Tareenka oo aad raaxdaa oo doorasho aad u fiican gaar ahaan safarada dhaadheer. Finland tareenka in lagu safraa waa mida ugu macquulsan. Isticmaalka tareemadu aad buu u badanyahay. Shirkada tareemada waxaa layidhaa VR Oy. waqtiga iyo macluumaad dheeraadaba waxaa ka helaysaa bogga tareemada ee VR. Tigidhka tareenka waxaa fiican inaad iibsato waqti hore xarumaha tareemada ama bogga shirkada. Warbixin dheeraada boga shirkada: www.vr.fi



Gaadhiga

Hadii aad isticmaalayso gaadhigaaga, waa inaad barataa sida loo dhaqaaleeyo qaabka wadida. Waxay suurtogalinaysaa inaad isticmaasho bensiin yar, waxa kale oo yaraanaya qiiga oo hawada iyo deegaanka u xun iyo gaadhiga oo aad daryeesho. Finland waxaa qasaba in suunka la xidho marka gaadhiga la wadayo!

Wadida iyo dhaqaaleynta gaadhiga

- Markaad gaadhiga dhaqaajiso sida ugu dhaqso badan u isticmaal marshooyinka waaweyn. Kuwad geerka/marshada ugu weyn si baasinku u dhaqaaloobo.
- Gaadhiga u wad xawaare isku dhow, hadii marna aad gaaska ma sheelara ku badiso marna aad biriiga qabato, wuxuu isticmaalayaa baasiin badan.
- Hadii aad dhaafto gawaadhida kaa horeeya, ogow waqti kuuma dadajinayaane, waxayse keentaa khatar weyn iyo basiin cunid badan.
- Gaadhiga ayayna kuu dhex oolin alaab aanad u baahnayn, waayo culasku wuxuu keenayaa baasiin cunid badan.
- Eeg, hawada taayirka. Hadii hawadu ku yartahay wuxuu keenaa baasiin cunid badan waxayna keentaa shil si fidud ku dhaca.
- Gaadhiga daryeel si joogto ah. Gaadhiga la daryeelo waxaa yar isticmaalka basiinka marka loo eego kan bilaa daryeelka.
- Hadii aad rabto inaad gaadhi iibsato, soo iibso mid bansiin cunid yar qaaciisuna yar yahay

Gaadhiga iyo waqtiga barafka

- Waqtiga barafka jidadku waa lagu siibtaa inta badan. Waqtiga Jilaalkana waa madow inta badan.
- Waqtiga barafka waa in gaadhiga laga badalaa taayirada. Waqtiga barafku wuxuu bilaabmaa disembar dhamaadaana febraayo.
- Waqtiga barafku iyo jidadka barafka leh waa inaad gaadhiga si taxadirle u wadaa. Gaadhiga kaa horeeyana aanad u dhawaan, waayo biriigu si fiican waqtigaa uma shaqeeyo.
- Marka kulayku ka hooseeyo + 5 digrii, waa in gaadhiga la gasho dabka ku yaala booska la dhigo gaadhiga. Gaadhiga oo qabowbina wuxuu keenaa bansiin cunid badan. Waxaa ku filan sodon daqiiqo inaad galiso korontada marka ay cimiladu tahay + 5 °C... - 5 °C. Saacad - 10 °C, Laba saacadood - 20 °C:ssa.

